

**Buug-gacmeedkani waxaa loogu talagalay in uu noqdo macluumaad sharci ah oo guud. Maaha talo sharci ah oo ku saabsan kiiskaaga gaarka ah. Haddii aad jeclaan lahayd talo ku saabsan kiiskaaga, waa in aad la xiriirtaa qareen. macluumaadka la iskala soo xiriirayo oo loogu tagalay barnaamijka gargaarka sharciga ah waxaa laga helayaa dhinaca hoose ee xaashida macluumaadka.**

## **XUQUUQDA IJAARTAYAASHA EE SII JOOGIDA GURIGA (LACAG BIXINTA LALA SOO DAAHO)**

Ijaartayaasha waxay hadda leeyihiin xuquuq cusub ee in ay soo joogaan guryahooda haddii ay bixiyaan ijaarka ama lacag kale oo uu ku leeyahay mulkiile guri oo soo daahday. Ijaartayaashu waxay leeyihiin xuquuq ay ku joojiyaan iska saarida guriga haddii ay bixiyaan ijaarka soo daahay ee mulkiilahooda guriga, kharashka, ama adeegyada ‘utilities’ marka la joogo waqti kasta ilaa laga gaarayo maxkamadda. Mulkiilayaasha guryuhu ma laha xuquuq ay ku diidaan aqbalaada lacag bixinta lala soo daaho, xataa haddii taariikhda ay ku aadan tahay ee ku qoran ogeysiinta bixin la’aanta lacagta ijaarka laga soo gudbay.

### **Goorma ayay ijaartayaashu bixin karaan lacagta?**

Ijaartayaashu waxay bixin karaan lacag ay ku leeyihiin mulkiilayaashu guryaha waqti kasta ka hor xukunka iska saarida guriga. Ijaartayaashu waxay bixin karaan:

- Ka hor inta aysan ogeysiinta bixin la’aanta lacagta ijaarka waqtigeedu dhicin
- Ka dib inta aysan ogeysiinta bixin la’aanta lacagta ijaarka waqtigeedu dhicin, laakiin ka hor inta aan kiiska maxkamadda iska saarida guriga aan la gudbin
- Marka la joogo ama ka dib imaanshaha u horreeya ee kiiska maxkamadda iska saarida guriga
- Marka la joogo ama ka hor maxkamadda ee kiiska maxkamadda iska saarida guriga

### **Waa maxay noocyada lacagaha ay ijaartayaashu bixin karaan goor dambe?**

Ijaartayaashu waxay bixin karaan lacagta ijaarka, kharash bixinta lala soo daaho, ama kharashyada kale, ama adeegyada ‘utilities’ ee ijaartuhu siiyo mulkiilaha guriga marka la joogo waqti kasta ilaa laga gaarayo maxkamadda. Ijaartayaasha **ma** bixin karaan lacagta lagu leeyahay ee loogu talagalay burbur soo gaara guriga ijaarka ah ee soo daahda, marka laga reebo mulkiilaha guriga oo doorta in uu aqbalu lacagta. Haddii ijaartayaashu helaan ogeysiin faraysa in la bixiyo lacag si ay u daboosho burbur uu ijaartuhu u geystay guriga ijaarka ah, lacag bixinta waa in lagu sameeyaa waqtigii loogu talagay.

### **Miyaa ijaartayaasha lagu yeelan doonaa kharash bixinta lala soo daaho ama kharashka maxkamadda haddii ay bixiyaan goor dambe?**

**Haa.** Haddii ijaartayaashu lacagta bixiyaan goor dambe, waxaa dhici karta in ay mulkiilaha guriga uu ku yeesho iyaga kharash bixinta lala soo daaho haddii kharash bixinta lala soo daahaa uu ku qoran yahay heshiiska ijaarka. Laakiin haddii mulkiilahaaga gurigi uu kiiska iska saarida guriga ka gudbiyo maxkamad, ijaartayaashu waxay yeelan karaan in la buriyo kiiska iyaga oo bixinaya lacagta qaddarka lagu tilmaamay ogeysiinta iska joojinta ijaarka. Ijaartayaashu maaha in ay bixiyaan lacagta wax kasta oo dheeraad ah si kiiska meesha looga saaro oo loo buriyo. Laakiin mulkiilayaasha guryuhu waxay weli diri karaan biilka kharash bixinta lala soo daaho ama kharashka u gudbinta maxkamadda ka dib marka kiiska la buriyo ee meesha laga saaro.

### **Sidee bay ijaartayaashu lacagta u siiyaan mulkiilayaasha guryaha?**

Ijaartayaashu waa in ay xaqiijiyaan in haddii ay goor dambe lacag siiyaan mulkiilayaashooda guryaha, in ay haystaan caddeynta lacag bixinta. Ijaartayaashu waa in aysan **marnaba bixin lacag caddaan ah ilaa ay ka helaan risiit**. Haddii ijaartayaashu lacag siiyaan mulkiilayaashooda guryaha ka dib dib marka kiiska maxkamadda la gudbiyo, ijaartayaashu weli waxay u baahan yihiin in ay **yimaadaan taariikhaha maxkamadda si ay maxkamadda** ugu sheegaan mulkiilaha guriga lacag la siiyay.

### **Yaa loo oggol yahay in uu bixiyo lacag?**

Mulkiilayaasha guryaha looma oggola in ay diidaan lacag bixin ka socota ijaarte, hay'ada taageerada dhanka ijaarka, ama koox saddexaad. Haddii ijaarte, ama qof ka wakiil ah ijaartaha, isku dayo in uu lacag siiyo mulkiilaha guriga, oo mulkiilaha gurigina diido lacag bixinta, taasi waxay dhici karta in ay noqoto difaaca dhanka kiiska maxkamadda iska saarida guriga. Ijaartayaashu waa in ay helaan caddeyn ah in mulkiilaha gurigu diiday in uu aqbalo lacag bixinta oo caddenta u keeno maxkamadda.

Haddii aad jeclaan lahayd in aad qareen kala hadasho xuquuqda aad leedahay, waxaad macluumaadka lagala xiriirayo ka heli kartaa xafiiska gargaarka sharciga oo kuu dhow oo ku yaala <https://oregonlawhelp.org/find-legal-help>.